



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
Ministry of Information, Culture & Tourism  
Office of the Minister

SUMMAD: WWDHD/XW/015/2020

Date: 13/02/2020

Ku:	Maareeyaha Golaha Murtida iyo Wacyigelinta	=Muqdisho=
Ku:	Agaasimaha Hobolada Waaberi iyo Waxsoosaarka	=Muqdisho=
Og:	Gudiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda	=Muqdisho=
Og:	Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada	=Muqdisho=
OG:	Wasaaradda Maaliyadda	=Muqdisho=
Og:	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya	=Muqdisho=

Uj: Kala saarid xilka iyo waajibaadka shaqo ee Maareeyaha  
Tiyaatarka iyo Agaasimaha Hobolada Waaberi.

Ilaa iyo intii la magacaabay Maareeyaha cusub ee Golaha Murtida iyo wacyigelinta **Mudane Abwaan Shubbe**, shaqadana dib loogu celiyey oo loo Magacaabay Agaasimaha Maamulka ee Golaha Murtida iyo Wacyigelinta **Agaasime Barow**, waxaa soo ifbachay in ay hakad galeen hawlihi Hobolada Waaberi ee uu sida wanaagsan u waday Agaasimaha Hobolada Waaberi iyo Waxsoosaarka **Mudane Nimcaan** oo runtii mudadii yareyd ee uu joogay weji wanaagsan u yeelay waxqabadka kooxda kuna soo biiriyey dhalinyaro si Volunteer ah heeso, majaajilo iyo riwaayado ugu duuba warbaahinta Dawladda iyo wacyigelinta Bulshada.

Hadaba si wax waliba u kala cadaadaan waxaan halkan hoose ku muujinayaa xilka iyo waajibaadka shaqo ee Maareeyaha iyo Agaasimayaasha Magacaaban, waana sidan:-

1. Maareeyaha Tiyaatarka oo ah Abwaan weyn oo aanu runtii u hayno xushmad iyo qaderin farabadan, marka laga reebo in qibradiisa, taladiisa iyo odaytinimadiisa ku biiriyey kooxda Qaranka ee Waaberi waxay shaqadiisu tahay:-
  - Mid ka balaadhan kooxda Waaberi oo keliya, waana maamulaha Tiyaatarka Qaranka oo xarun u ah dhamaan kooxaha Qaranka, bahda fanka, suugaanta, dhaqanka iyo abwaaniinta Soomaaliyeed.
  - Maadaama dhowaan dib loo furayo tiyaatarka qaranka waa in uu ku mashquulaa oo xil weyn iska saaraa hubinta in hawlaho dhameystirka Tiyaatarku si fiican socdaan sida dhameystirka dhismaha, naleyntha (Lighting system), codadka (sounding System), amniga (security system) iyo iwm.
  - Waa in uu qorsheeyaa qaabka xaflada furitaanka Tiyaatarka u dhacayso, isla markaana diyaariyaa kooxihi, abwaanadii, madaxdii iyo marti-sharafkii ka soo qaybgeli lahaa furitaanka Tiyaatarka 30 sano ka dib.
  - Markii Tiyaayarka la furo wuxuu maamulayaa habsami u socodka hawlaho iyo Jadwalka Tiyaatarka oo noqon doona meel maalin walba hawl muhiim ah lagu hayo oo kooxaha Qaranku ku kaltamayaan wacyigelinta bulshada ama hawl dawladeed oo kale ka socoto.
2. Agaasimaha Maamulka ee Golaha Murtida iyo Wacyigelinta waxaa waajibkiisa shaqo yahay oo loo magacaabay in uu Maareeyaha kala shaqeeyo oo la fududeeyo dhameystirka dhismaha Tiyaatarka iyo in uu dejiyo qorshihii maamul iyo maaliyadeed ee Tiyaatarka lagu furi lahaa ama uu ku shaqeyn lahaa markii la furo.
3. Ugu dambeyn, waxaan doonayaa in aan halkan ku cadeeyo in Agaasimaha Kooxda Waaberi Mudane Nimcaan masuul yahay hawl gelinta iyo waxsoosaarka kooxda. Sidaas awgeed, Abwaanada iyo Fanaaniinta waaweyn ee mudada dheer dalka u soo shaqeynayey laakiin hada hawlgabka ku dhow ama ah oo runtii aanu u hayno xushmada iyo Qaderinta ay mudan yihiin, waxaanu ka

codsanaynaa in ay Agaasimaha Kooxda Waaberi ku-kabaan wixii talo, qibrad, waayo-aragnimo iyo toosin ah laakiin ay shaqada qaranka ka daayaan is-hor-istaaga iyo carqalada ay ku hayaan.

Intaas waxaa dheer oo jira in qaar badan oo ka mid ah kooxda waaberi oo bil walba ka qaata dawladda lacag ku dhow kun dollar wax shaqo ahna aan dawladda u qaban, Agaasimaha cusubi ugu taag la'yahay in ay soo xaadiraan shaqadooda oo ka qayb qaataan hawlaha kooxdu wado ee wacyigelinta bulshada, iyagoo doonaya in ay Warbaahin iyo TV-jo gaar loo leeyahay ugu shaqeeyaan 200 dollar, Dawladda oo ay lacagtaas badan ka qaataana ka dhuuntaan shaqadeeda. Kuwaasoo had iyo jeer ka shaqeeya in uu kaco muran, isqabsi iyo kalatag, si ay fursad kale ugu helaan ka dhuumashada shaqada Qaranka.

Waxaan xubnahaas oo si fican wejiyadooda bulshada uga taqaan sida ay daacada ugu yihiin shaqada ay u hayaan Warbaahinta gaarka loo leeyahay, iyo dhamaan Hobolada Waaberi ee sharafta leh u sheegayaa in uu dhamaaday xilligii isla xisaabtan la'aantu oo sida uu qorayo sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda, Nidaamka Dawliga ah iyo siyaasadda ladagaalanka musuqmaasuqa shaqada ee Dawlada Nabad iyo Nolol laga rabo maalin kasta 8-saacadood oo shaqo ah oo bisha dhamaadkeeda uu noo soo gudbin doono Agaasimaha kooxdu, cidii aan xilkeeda gudanna aan wax mushahaar ah la siin doonin.

Shaqo wacan



Hon: Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye)  
Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska